

## Taageeridda kalkaaliyayaasha caafimaadka ee wax ku bartay si caalami ah

Febraayo 13, 2023 Weydiimaha warbaahinta

Dowladda Alberta waxay abuureysaa in ka badan 600 oo boosas cusub ah oo loogu talagalay barnaamijiyada isku xirka kalkaalisaada oo lagu maalgeliyo deeq cusub oo loogu talagalay kalkaaliyeyaasha wax ku bartay caalamka.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha daryeelka caafimaadka safka hore ee ugu wanaagsan adduunka. Dowladda Alberta waxay ka shaqayn doontaa sidii ay u heli lahayd taageerooyin sax ah si loo hubiyo in reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin, goorta iyo meesha ay uga baahan yihiin. Iyadoo loo maraayo Miisaaniyadda 2023, dowladda Alberta waxay maalgelin doontaa in ka badan \$15 milyan si ay u tababarto oo ay u taageerto kalkaaliyeyaal wax ku bartay caalami ahaan. Tani waxay hubin doontaa in nidaamka daryeelka-caafimaadka Alberta uu sii ahaado mid xooggan hadda, iyo mustaqbalka.

### Deeqaha loogu talagalay kalkaaliyayaasha caafimaadka ee wax ku bartay si caalami ah

Marka loo eego Miisaaniyadda 2023, dowladda Alberta waxay maalgelin doontaa \$7.8 milyan sannadkiiba si ay u maalgeliso kaalmo maaliyadeed oo aan dib loo bixin

doonin xagga kalkaaliyayaasha leh waxbarasho caalamiya. Tani waxay ku dul dhismaysaa tii deyrpii hore ee ahayd \$1.25-milyan ee lagu dhawaaqay sii loogu maalgeliyo kaalmo maaliyadeed oo cusub xagga kalkaaliyayaasha leh waxbarashada caalamiga ah.

Kalkaaliyaasha leh waxbarashada caalamiga ee xaqa u leh waxay awood u yeelan doonaan inay helaan ilaa \$30,000 muddo shan sano ah si ay gacan uga geysato daboolidda is-dhimista kharashyada barnaamijyada isku xidhka kalkaalinta, waxbarashada iyo kharashyada nolosha. Deeqda waxbarasho ayaa la heli doonaa sannad dugsiyeedka 2023-24.

Qaatayaasha deeqda waxaa looga baahan yahay inay dhammeeyaan hal sano oo ah adeeg kalkaaliyanimo ee Alberta una dhiganta \$6,000-kasta oo la bixiyo. Tani waxay hubin doontaa in bukaannada Alberta iyo bulshooyinku ay ka faa'iidaystaan in la helo kalkaaliyayaal badan oo shaqadooda ka bilaaba gobolka. Qolo saddexaad ayaa kormeeri doonta barnaamijka oo bixin doonta kaalmada iyagoo ka wakiil ah Deeqda Ardayda Alberta (Alberta Student Aid).

Mid kastoo wax ku bartay kalkaalisanimo si caalimiya oo ku nool Alberta, oo si guul leh isaga diiwaan geliyay barnaamijka isku xidhka la ansixiyay, ayaa u qalmi doona deeqda iyadoo aan loo eegin u-qalmitaankooda kaalmo kastoo kale oo ah deeq federaal ama heer gobol. Qaddarka deeq kasta oo loo qalmo waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu saleynaayo barnaamijka shakhsiga ee daraasadeed, kharashka waxbarashada, ruqsadda iyo khidmadaha barnaamijka, iyadoo ugu yaraan \$8,000 la bixinaayo.

Tani waxay fulineysaa mid ka mid ah heshiisyadii is-afgaradka ee dhawaa ee u dhexeeyay dowladaha Alberta iyo Phillipines si loogu soo jiito kalkaaliyayaal xagga Alberta laguna hayo gobolka.

## **600 boosas cusub oo ah barnaamijyada isku xidhka kalkaalisada Alberta**

Lacag dheeraad ah oo ah \$7.3 milyan ayaa lagu maalgelin doonaa muddo saddex sano ah si loo abuuro in ka badan 600 oo boosas cusub ah xagga kalkaalisada diiwaangashan iyo kuwa ruqsadda leh ee isku xidhka kalkaalisada iyo barnaamijyada ruqsadda, laga bilaabo sannad dugsiyedka 2023-24.

Maalgelintani waxay abuuri doontaa 256 boosas cusub dhanka barnaamijka isku xidhka kalkaalisada ee Jaamacadda Mount Royal. Waxay sidoo kale maalgelin doontaa 120 boosas cusub dhanka Kulliyadda Bow Valley iyo 250 boosas cusub dhanka Kulliyadda NorQuest ee barnaamijyadooda isku xirka kalkaalisada ruqsadda leh.

### **Xogta la xidhiidha**

- [Dadka reer Alberta ee wax ku baranaaya dibadda iyo ardayda caalamiga](#)
- [Alberta 2030: Dhisidda Xirfado xagga Shaqooyinka](#)
- [Qorshe-Hawleedka Daryeelka Caafimaadka](#)

### **Warbaahin kala Duwan**

- [Daawo shirka jaraa'id](#)